# SAMAYNTA ISDHEXGAL QOYS AHAAN



# Tusmada qoraalka

Gogoldhig 3

**Maxaan u baahanahay si aan isdhexgal u sameeyo? 4**

**Isdhexgalku waa hannaan 6**
- Dhiirigalin 10
- Yoolka 11

**Luuqadda – furaha bulshada 12**

**Xubin ka noqoshada bulshada Finnish-ka 14**

**Dhaqanka shaqada Finnish-ka 16**
- Canshuuraha 18
- Dhaqaalaha shakhsiga 19

**Caafimaadka iyo nasashada 20**
- Shaqada isdiridda 21

**Aqoonsiga 22**

**Xiriirka 24**

**Qoyska 26**

**Sheekooyinka isdhexgalka 28**

# GOGOLDHIG

Waxaad u soo guurtay waddan cusub. Waxa jira waxyaalo badan oo Finland kaga duwan tahay waddankaagii. Waxyaalo badan ayaad la yaabi kartaa. Waxyaalaha cusub waxa ka mid ah luuqadda, dhaqanka, caadooyinka, cimilada, cuntada iyo dadka. Ku qaabil dhammaan waxyaalaha cusub cabsi la'aan iyo maskax furan!

Waa u muhiim qoyska oo dhan – xubin kasta oo qoyska ah – inuu dhexgal la sameeyo waddanka cusub. Qof kasta sidoo kale wuxuu xaq u leeyahay inuu dhexgal sameeyo. Inuu daneeyo sida xubnaha qoyska ee kale u samaynayaan isdhexgalka iyo istaageeridda midba kan kale. Samee mashruuca qoyska.

Buugyarahani wuxuu ka hadlayaa waxyaalo ka caawin kara adiga iyo qoyskaaga isdhexgalka.

Ku Soodhawow Finland!



# MAXAAN U BAAHANAHAY SI AAN ISDHEXGAL U SAMEEYO?

Samaynta isdhexgalka waxay ka dhigan tahay la qabsiga waddan cusub iyo barashada aqoonta iyo xirfadaha aad u baahan tahay bulshada dhexdeeda iyo shaqada. Samaynta isdhexgalku kama dhigna inaad illawdo luuqaddaada iyo dhaqankaaga. Waa arrin fiican inaad sii waddo ku hadalka luuqadda aad u dhalatay. Dhaqankaagu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah aqoonsigaaga waxaana muhiim ah inaad qayb ka noqoto bulshada Finnish-ka adigoo dhinaca kale ilaashanaya luuqaddaada iyo dhaqankaaga. Samaynta isdhexgalku waxay dhacdaa maalin kasta, waxayna ka dhacdaa dugsiga, shaqada, hiwaayadaha ama xataa tukaanka raashinka.



La samaynta isdhexgal waddankaaga cusub waa muhiim si aad markaa u noolaan karto nolol madax bannaan oo aad dareento inaad garanayso sida wax loo qabto oo aad nolosha si caadi ah ugu wadato. Dadka Finns-ka waxay aad kuu qaddarin doonaan haddii aad firfircooni muujiso oo aad isku-daydo inaad wixii kugu aada samayso. Finland waxay noqon doontaa sida waddankaagii oo kale marka aad u qaban karto hawlaha maalinlaha ah si madaxbannaan oo aad fahamto bulshada kugu xeeran.

Masuuliyadda koowaad ee samaynta isdhexgalku adiga ayey ku saaran tahay. Ma jirto cid kale oo samaynta isdhexgalka kuu samayn kartaa. Waa inaad noqoto qof firfircoon oo aan gabbanayn, waana sidaas sida ugu fiican ee aad wax badan ku baran kartaa. Naftaada ku bogaadi inaad adigu wax qabsanayso iyo inaad saamayn ku yeelanayso dhammaan waxyaalaha aad wax ka mid ah qaban karto.

# ISDHEXGALKU WAA HANNAAN

Degitaanka iyo la qabsiga waddan cusub waxay keeni karaan dhammaan noocyada cadaadiska maskaxeed. Samaynta isdhexgalku waxay keeni kartaa dareeno kale duwan laga bilaabo mahadin ilaa u boholyoobid waddankaagii iyo cabsi. Xasuusnaw in dhammaan dareenadani ay yihiin wax caadi ah. Inaad ka hadasho dareenkaagu waa muhiim ah waxaanad ka helaysaa nafisid.



**La qabsiga waddan cusub waxa lagu sharrixi karaa hannaan leh saddex marxaladood:**

- Ugu horrayn, wax kasta waa cusub yihiin waana gooni: saaxiibadaa, guriga, muuqaalka dhulka iyo luuqadda. Marxaladdan waa mid cabsi la dareemi karo, sababtoo ah wixii aad taqaanay wax ka duwan ayaad arkaysaa. Waxaad dareemi kartaa jahawareer iyo keli.
- Marxaladda xigta, waxaad bilaabi doontaa inaad u kuurgasho xaaladaha waddankaaga cusub oo aad sida badanna garab dhigto waddankaagii. Markaad bilawdo inaad barato luuqadda Finnish-ka, xiriirka aad la leedahay waddankaaga cusub waa isbaddali doonaa waxaana horey u socon doona hannaanka aad isdhexgalka ku samaynayso.
- Marxaladda saddexaad, waxaad awoodi doontaa inaad isku dheellitirto dhaqanka waddankaagii iyo dhaqanka waddanka cusub iyo in Finland aad ku dareento sidii waddankaagii oo kale.



Xiriirada togan ee aad la samaynayso dadka kale iyo xirfadaha dhexgalka bulshada ayaa muhiim u ah caafimaadkaaga maskaxeed muddada hannaanka samaynta isdhexgalku socdo. La kulan saaxiibaada iyo qoyskaaga. La hadal dadka kale oo u sheeg sidaad dareemayso. Waxa dhici karta inay qabaan dareeno iyo aragtiyo kuwaaga la mid ah.

Isdhexgalku waa mid fudud haddii aad barato luuqadda, aad muujiso inaad dareen iyo xiise u qabto arrimaha, aad sahamiso meelo cusub lana kulanto dad cusub. Guriga uun ha joogin, laakiin bax oo raadso dad aad isbarataan oo ka fogow inaad ku ekaato meelaha aad taqaan oo kaliya. Ku qaabil wax kasta oo kugu cusub cabsi la'aan iyo maskax furan!





# DHIIRIGALIN

Inaad hesho dhiirigalin gudahaaga ah waa muhiim ah. Waa shaqo adiga kuu taala inaad qaadato go'aanka ah inaad rabto samaynta dhexgalka waddankaaga cusub.

Ka feker waxa kugu dhiirigalin kara inaad samayso isdhexgal iyo halka aad ka heli karto dhiirigalin, tusaale ahaan inaad barato luuqadda cusub. Ma tahay mid jecel inuu awoodo inuu isagu maareeyo arrimihiisa ama helidda shaqo si fudud? Amase laga yaabo inay u fududahay inuu la sheekaysto dadka Finns-ka oo uu samaysto saaxiibo cusub? Sidoo kale waxa ku dhiirigalin kara inaad awooddo inaad akhrido jaraa'idada Finnish-ka iyo inaad fahamto bulshada kugu xeeran. Qof kasta waxa dhiirigaliya waxyaalo gaar ah, waana inaad ka fekerto waxa adiga ku dhiirigaliya.



## YOOLKA

Waxay noqon kartaa mid fudud inaad hesho dhiirigalin haddii aad leedahay yoolal. Tusaale ahaan, waxaad ka fekeri kartaa inaad bilawdo waxbarashada xirfadaha, raadiso shaqo, iibsato guri ama awooddo maaraynta arrimahaaga gaarka ah si madaxbannaan muddo hadda ay ka harsan tahay hal sano. Sidoo kale waxa fikrad fiican ah inaad damacaaga kala hadasho qof xirfadle ah.

**Iswaydii:**
Waa maxay yoolkaygu waana maxay fursadaha aan u haysto inaan gaaro meesha aan rabo inaan gaaro?

Ma yeelan doonaa guri aan leeyahay 10 sano gudahood oo dhammaan xubnaha qoyskaygu ma ku noolaan doonaan nolosha ay rabaan inay ku noolaadaan iyo yoolka ay rabaan inay gaaraan?

Qoys ahaan yoolashayadu ma isku midbaa?

Sidee ayaanu u gaari karnaa yoolashayada?

Sidoo kale waxaad samaysan karta adigu si gaar ah yoolal yaryar – tusaale ahaan, barashada 10 eray maalintii. Yool kale wuxuu noqon karaa raadinta ugu yaraan shan fursadood toddobaadkii kuwaasi oo aad afka Finnish-ka aad cid kula hadasho.




Riyadaadu ha caddaado oo qorshena sii dejiso.

# LUUQADDA – FURAHA BULSHADA

Barashada luuqaddu waxay ka ciyaartaa door muhiim ah samaynta isdhexgalka. Si aad u dareento inaad ka tirsan tahay bulshada Finnish-ka, waxaad u baahan doontaa inaad barato luuqadda Finnish-ka.

Luuqaddu waxay kuu abuuri doontaa fursado badan: waxaad samaysan kartaa xiriiro cusub, waxaad baran kartaa dad cusub, waxaad heli kartaa shaqo ama meel aad wax ku barato oo sidaa aad horey ugu socon kartaa. Barashada luuqaddu waxay kaa caawin doontaa inaad si wacan u fahamto waddanka iyo dhaqanka cusub, inaad daawato warka Finnish-ka iyo barnaamijyada telefishanka ee kale. Noloshaada maalinlaha ah waxay u socon doontaa si fudud waxaanad heli doontaa fursado shaqo oo kala duwan.

Carruurtu sida badan luuqadda horey ayey u bartaan. Dadka waawayn luuqadda way baran karaan haddii ay dadaal ku bixiyaan.



## Sideed u baran kartaa luuqadda?

Ha ka cabsan isticmaalidda luuqadda, sida shimbirta baqbaqaaqa samee oo ku celi wixii aad maqashaba. U diyaarsanow oo qabso erayada kaaga imanaya deegaankaaga. Inaad qalad samayso ha ka cabsan. Ciyaar ka day markaad baranayso. U hamuum oo xiise u muuji luuqadda cusub. Luuqadda ku barbaro mar kasta.

Ku baro luuqadda koorso ama dugsi, wakhtiga firaaqada si gaar ah ugu dadaal. Isticmaal intarnetka, YouTube-ka, apps-ka iyo buugaagta luuqadda. Ku daawo afka Finnish-ka bandhigyada TV-ga, warka luuqadda fudud iyo barnaamijyada carruurta. Ku dhagayso afka Finnish-ka raadiyowga iyo muusiga oo hiwaayad ka dhigo. Ha ka cabsan inaad dadka kula hadasho afka Finnish-ka, xataa haddii aad taqaan dhawr eray. Akhri noocyada kala duwan ee qoraalada, buugaagta carruurta, jaraa'idada iyo majaladaha, xayeysiisyada iyo shaxda tusmada qoraalada.

Isticmaal mawduucyo iyo agab aad xiisaynayso si aad u barato luuqadda cusub! Raadi qaababka barashada ee adiga ku anfacaya, waxa jira siyaalo badan oo la heli karo.

### Xafid oo baro inaad qorto:

magacaaga, baadisoocda aqoonsigaaga, cinwaanka iyo lambarka taleefanka

# XUBIN KA NOQOSHADA BULSHADA FINNISH-KA

Halkan Finland, dadka oo dhan waa isku mid dhanka xuquuqda, waajibaadka iyo fursadaha. Gabi ahaan waa inaad barato. Halkan Finland, diintu ma saamayso go’aanada ama sida dadka loola dhaqmo.

Halkan Finland, waa waddan xor ah, dadkuna waxay xor yihiin inay waxyaalo badan sameeyaan halkan. Tusaale ahaan, halkan Finland waxaad leedahay xorriyad diimeed iyo xorriyad hadal, xorriyad doorasho halkaad ku noolaanayso iyo xorriyadda inaad doorato lammaanahaaga. Halkan, cid kasta ikhiyaarkeeda ayey ugu noolaan kartaa si gaar ah iyo sida ay rabto.

Halkan Finland, waxaanu rumaysannahay inaynu bulshadan wada dhisnay markaa ay masuuliyadd inaga saaran tahay gabigeenaba. Deegaanka waanu ilaalinaa, daacad ayaynu isku nahay dhexdeena iyo bulshadaba.



Halkan Finland, waajib ayaa kaa saaran inaad sharciga raacdo. Sharciga waa loo wada siman yahay oo cidna cid wax ma dheera. Lama oggola in cid si gaar ah loola dhaqmo iyadoo la eegayo jinsiga, da'da, diinta, naafonimada ama sifo kale. Waalidiinta waajib ayaa ka saaran inay carruurtooda daryeelaan. Waajibaabyada kale waxa ka mid ah waxbarasho khasab ah, qofku inuu masuul ka noqdo wixii uu gaysto iyo waajibaadka caawinta dadka kale ee uu ku dhaco shil ama xaalad gurmad ah la soo deristay.




# DHAQANKA SHAQADA FINNISH-KA

Daacadnimada iyo dadaalka ayaa ammaan leh marka shaqada la joogo. Haddii ay jiraan wax aadan fahmin, waydii dadka, oo ha ka maagin inaad haddana waydiiso isla wixii hore. Waxa kuu muhiim ah inaad garanayso waxaad qabanayso oo aad fahamsan tahay waxa lagaa doonayo inaad qabato. Ma jirto cid kugu xanaaqaysa haddii aad su'aalo badan waydiiso. Horjoogayaashaada iyo saaxiibadaada shaqadu way ku caawin karaan – waad u tagi kartaa oo aad la hadli kartaa oo aad warsan kartaa caawimo.



Sinnaanta iyo caddaaladdu waa qiyam muhiim ah shaqada dhexdeeda sidoo kale. Waxa kuu muhiim ah inaad mushkiladaha xallin karto oo aad noqoto qof masuuliyad qaadi kara oo la isku hallayn karo. Waa inaad noqoto qof xaadir ah markay noqoto jadwalka shaqada. Waa inaad had iyo jeer u sheegto horjoogahaaga haddii aad yara daahayso ama aad xanuusan tahay. Kama maqnaan kartid shaqada bilaa sabab. Waa inaad horjoogahaaga had iyo jeer kala hadasho maqnaanshahaaga. Halkan Finland, diinta ama dhaqankaagu saamayn ku yeelan maayo shaqadaada. Markaad shaqada joogto, raac xeerarka guud ee goobta shaqada, wakhtiga firaaqadu isagu waa gooni.



# CANSHUURAHA

Halkan Finland, dadka waxa dakhliyadooda oo dhan canshuur ka qaada dawladda. Canshuuraha sidoo kale waxa laga qaadaa alaabta iyo adeegyada. Canshuuraha waxa had iyo jeer la bixiyaa mar kasta oo wax la kala iibsado. Maadaama dadka ku sugan Finland ay canshuuro bixiyaan, dhammaan xubnaha bulshadu waxay xaq u leeyihiin inay helaan adeegyada dadwaynaha ee aasaasiga ah iyo ammaan. Tusaale ahaan, uma baahnid inaad bixiso kharashka isbitaalada waawayn. Finland waxay leedahay waxbarasho fiican oo bilaa lacag ah oo canshuurta laga maalgaliyo. Sidoo kale canshuurta waxa laga maalgaliyaa faa'idooyinka ilmaha, kaalmada bulshada ee aasaasiga ah iyo lacagta dadka hawlgaba la siiyo.

Bixinta canshuurtu waa muhiim waana waajib saaran muwaadin kasta, sababtoo ah waxyaalo iyo adeegyo badan oo aynu si bilaa lacag ah ku helno waxa laga maalgaliyaa canshuurta.



## DHAQAALAHA SHAKHSIGA

Waa muhiim inaad ilaaliso ood la socoto dhaqaalahaaga. Waa inaad samaysato miisaaniyad, qorshayso kharash-garayntaada kana fekerto sida ay lacagtaadu bisha oo dhan kuugu fillaan lahayd. Ugu horrayn, bixi kharashka daruuriga ah, sida kirada iyo korontada. Intaas kadib, waxaad qiyaasi kartaa xaddiga lacagta u soo hartay inaad ku bixiso kharashaadka kale ee bishaas.

Daynta macmiilka, dayn-ku-qaadasho (qorshayaasha bixinta kolba qayb) iyo daymaha dhakhsaha ah waa fududdahay in la helo, laakiin way adag tahay soo celintoodu. Waxay ku galin karaan dhibaatooyin dhaqaale. Inaad qaadato ka fogow. Haddii aad u baahan tahay inaad wax iibsato, qiimayaasha isbarbardhig oo xasuusnaw in tukaanada waxyaalaha mustacmalka ah iibiyaa ay sidoo kale iibiyaan waxyaalo badan oo cusub iyo dhar cusub oo qiimahoogu hooseeyo.



# CAAFIMAADKA IYO NASASHADA


Caafimaadkaaga ku dadaal. Caafimaadku wuxuu ka kooban yahay mid maskaxeed, mid jireed iyo mid bulsheed. Hiwaayadaha dhaqdhaqaaqa jireed leh iyo cunto dheellitiran waxaad ka heshaa dhisnaan jireed iyo tamar. Saaxiibada iyo hawlaha carinta leh ee wakhtigaaga firaaqadu waxay muhiim u yihiin awooddaada maskaxeed.

Waa aragti fiican inaad yeelato hiwaayado adiga iyo xubnaha qoyskaagu aad ku raaxaystaan kuwaasi oo taageera caafimaadka. Hiwaayad waxa looga jeedaa hawl aad ku raaxaysato qabashadeeda wakhtiga firaaqada. Waxay noqon kartaa wax la xiriira jimicsiga, fanka, falsamada ama wax kale oo ku galiya jawi wanaagsan oo ku xiise-galiya. Sahaminta deegaanka, tamashlaynta, gurista beeriga, kalluumaysiga iyo gurista boqoshaaga ayaa sidoo kale ah hiwaayado wacan oo kaa caawinaya inaad nasato oo aad ku ilaaliso maskaxdaada iyo jirkaaga caafimaad-qab.



## SHAQADA ISDIRIDDA

Shaqada isdiriddu waa inaad shaqayso bilaa lacag. Waxaad raadsan kartaa shaqo isdirid adigoo eegaya waxyaalaha aad xiisayso, tusaale ahaan ka raadsanaya ururada ama guryaha dadka waayeelka ah. Tani waxay ku siin doontaa wax macne leh oo muhiim ah inaad samayso oo sidoo kale aad ku dareento wacnaan. Shaqada isdiriddu sidoo kale waxay kaa caawisaa inaad hesho saaxiibo Finnish ah, barato luuqadda Finnish-ka oo aad barato dhaqanka shaqada ee Finnish-ka.




# AQOONSIGA

Aqoonsigu waa cidda aad isku taqaano iyo sida aad adigu isku aragto. Cid kastaba way leedahay aqoonsi qof ahaaneed mana jiraan jawaabo sax ah oo ku aaddan sida uu ku yimaaddo. Marka jawaabaha laga tago, waxa jira su'aalo tiro badan oo xubin kasta oo qoyska ah ay tahay inay uga fekerto goonideeda oo sidoo kalena ay kala hadasho dadka kale. Aqoonsigu sidoo kale waa isbaddalaa waana kobcaa marba marka ka dambaysa iyo mar kasta oo xaaladuhu isbaddalaan.

**Su'aalaha ay tahay inaad ka fekerto markaad u guurayso waddan cusub:**


- Maxay noqon aqoonsigayga iyo meeshaydu gudaha Finland?
- Sideen iskugu dheellitiri doonaa dhaqanka Finnish-ka iyo dhaqanka waddanka aan ka soo jeedo? Maxaan sii haysan doonaa maxaanse ka tagi doonaa?
- Sideen iskugu dheellitiri doonaa shaqada ama waxbarashada iyo qoyska?
- Miyaan u oggolaan doonaa carruurtaydu inay iyagu raadsadaan aqoonsigooda iyo jidka ay marayaan? Miyaan awoodi doonaa inaan aqbalo haddii ay dhexgalaan bulshada Finnish-ka si ka wayn sidayda? Miyaan diidi dooonaa misa waan ka caawin doonaa isbaddalada ku imanaya nolosha carruutayda?





# XIRIIRKA

Halkan Finland, kuma kaliyeysanaysid ammuuraha kaligaa. Dadka kugu xeeran iyo xirfadlayaasha la xiriir.



# Saaxiibada dugsiga



# QOYSKA

Halkan Finland, ragga iyo dumarku waa siman yihiin waxayna wadaagaan masuuliyadda qoyska, carruurta iyo maaraynta dhaqaalaha qoyska. Waa muhiim in labada lammaane awoodayaan inay maareeyaan arrimaha qoyska waana tan sababta dhammaan go'aanada khuseeya qoyska ay tahay in loo dhannaado. Ma aha masuuliyadda carruurta inay maareeyaan arrimaha ay tahay inay waalidiintu maareeyaan. Istaageeridda iyo isku muujinta in midba kan kale noloshiisa danaynayo. Inaad maalin kasta is caawisaan, sababtoo ah qoyskiina ayaa ah waxa idiinku muhiimsan nolosha.

Hannaanka samaynta isdhexgalku waa mid dadku ku kala duwan yihiin. Carruurta iyo dhallinyartu si dhakhso ah ayey isdhexgalka u sameeyaan. Sidoo kale waxa muhiim ah in waalidiintu ay sameeyaan isdhexgal oo ay la qabsadaan waddankooda cusub. Qoyska oo dhan sidan ayey wanaag ku dareemayaan. Carruurta arrimahoogu waa u gaar waxayna leeyihiin ikhtiyaar – ku taageer ilmaha arrimaha noloshiisa. Noqo qof si dhab ah u daneeya nolosha ilmihiisa. Su'aalo waydii, dhagayso oo dhiirigali ilmahaaga dhammaan dhinacyada nolosha.



Shaqo maalmeed, shaqooyinka maalin kasta la qabto oo toosan iyo hawlaha kala duwan waxay ka caawinayaan qoyska inay la qabsadaan waddanka cusub. Waxa laga helaa qaabdhismeed toosan maalin kasta. Ku dadaal in carruurtaadu hesho hurdo, nasasho iyo nafaqo ku filan. Dadka waawayn ee qoyska ayey khusaysaa inay carruurta xuduud u yeelaan oo ay ku dadaalaan in carruurtu si badbaado leh u koraan una kobcaan.

Iska kaashiga waxbarashada iyo daryeelka carruurnimada hore iyo dugsigu waxay muhiim u yihiin korriinka iyo koboca ilmahaaga. Yoolka guud waa in la soosaaro carruur caafimaad qabta, faraxsan oo karti leh. Si deggan u akhri dhammaan waraaqaha ilmahaagu uu guriga keeno. Kaqaybgal fiidadka waalidiinta iyo la sheekaysiga macallimiinta iyo daryeelayaasha. Haddii aad qabto su'aalo ama aad ka walaacsan tahay ilmahaaga, ha ka maagin inaad la xiriirto macallinkiisa. Ma jirto sabab uu macallinku u cabsi galinayo. Macallinku wuxuu rabaa inuu ogaado sida qoyskaaga xaaladdiisu tahay.



## SHEEKOOYINKA ISDHEXGALKA

SHEEKADA DHABTA AH EE NIN CARAB AH

Waxaan imi Finland anigoo magangalyo-doon ah toddoba sano kahor. Waxaan garawsaday inay meeshani tahay meesha aan ku noolaan doono inta noloshayda ka hadhay. Waxaan go'aansaday inaan sameeyo wax kasta si aan ula qabsado oon aan doorkayga ka ciyaaro bulshadan cusub ee cajiibka ah. Waxaan fursad u helay inaan noloshayda hoosta ka bilaabo. Waddan cusub – fursado cusub! Isla markiiba waxaan bilaabay inaan luuqadda barto. Hadda waxaan degganahay Finland toddoba sano, waxaan bartay xirfad cusub waxaanan haystaa shaqo rasmi ah. Waxaan leeyahay saaxiibo Finnish ah waana qaar ii fiican. Waxa ugu muhiimsan waxay ahayd barashada luuqadda Finnish-ka. Waxaan bartaa erayo badan iyo waxyaalo cusub maalin kasta. Barashada luuqaddu wax kasta ayey fure u ahayd.





SHEEKADA HAWEENAY AFRIKAAN AH

Waxaanu nimi Finland shan sano kahor aniga iyo qoyskaygu. Waxaan ahay hooyada qoys wata saddex carruur ah. Ugu horrayn, wax kasta waxay u muuqdeen wax adag oo cusub halkan Finland. Hadda waxaan bartaa inaan noqdo kalkaaliso sare sidoo kalena waxaan qabtaa shaqada kaaliye khaas ah. Riyadaydu waa inaan shaqo helo kadib markaan qalinjabiyo. Waxaan rabaa inaan noqdo xubin firfircoon oo ka mid ah bulshada oo u nool sida dadka kale ee Finns-ka. Inaan dadaalayo oo aan dhiiranahay waxay iga caawiyeen inaan isdhexgal sameeyo. Ma aan quusan, in kastoo dheellitirka luuqadda cusub, dhaqanka, dugsiga iyo qoysku ay sida badan adag tahay.

## SHEEKADA HAWEENAY KA TIMI KOONFUR AMEERIKA

Waxaan aniga iyo ninkaygu Finland u soo guurnay laba sano kahor. Ugu horrayn, waxaan guriga wada joognay wiilkayga oo aan afka Finnish-ka kaliday baranayey. Markii dambe, wiilkayga ayaa bilaabay shaqo daryeelka maalintii ah waxaanan markaa awooday inaan aado koorso afka Finnish-ka ah. Marka laga tago dugsiga, sidoo kale guriga ayaan ku bartaa Finnish-ka waxaanan aadaa meelaha aan luuqadda ku barbaran karo. Sidoo kale shaqadaydu waa nadiifiso. Waxaan dareemayaa in firfircoonidu ay ahayd waxa ugu muhiimsan ee samaynta isdhexgalkayga waddanka cusub. Kama cabsado inaan aado meelo cusub, anigoo kaqaybqaadanaya dhacdooyin oo isticmaalaya luuqadda Finnish-ka xaalad kasta. Luuqadda ayaa fure u ahayd isdhexgalka aan sameeyey.





## SHEEKADA HAWEENAY AFRIKAAN AH

Waxaanu u soo guurnay Finland saddex san kahor aniga iyo qoyskaygu. Waxaan ku dadaalay inaan barto luuqadda wakhtiga aan degganaa Finland oo dhan. Waxaan ahay qof firfircoon oo aan cabsan noloshayda maalin kasta waxaanan isku-dayaa inaan guriga mar kasta joogin. Waa muhiim inaad ka baxdo guriga, xataa haddii aad daallan tahay. Isdhexgalkayga, helitaanka dhiirigalin iyo samaysashada yoolal waxay ahaayeen muhiim, marka laga tago muujinta firfircooni iyo cabsi la'aan. Riyadaydu waxay ahayd inaan wax ka barto Finland si aan u noqdo kalkaaliso sare una helo shaqo. Hadda waxaa ii socda tabobar carbin ah oo iiga socda guri dadka waawayn lagu hayo waxaanan rajaynayaa inaan mustaqbalka halkaa ka shaqo galo. Finland wax badan ayey ii tartay, waa waddankayga cusub ee qaaliga ah!



SHEEKADA NIN CARAB AH

Finland waxaan imi siddeed sano kahor. Hiwaayadaha aan leeyahay ayaa door wayn ka qaatay isdhexgalka aan sameeyey, sababtoo ah waxaan yeeshay saaxiibo Finnish ah oo aan ka bartay luuqadda iyo dhaqanka. Intarnetka ayaa isna sidoo kale ii ahaa wax aad iiga caawiyey barashada luuqadda.

Kadib markii magangalyo la i siiyey, waxa la ii oggolaaday inaan barto injineerinka korontada. Waddankayga hooyo, qoyskaygu waxay leeyihiin shirkad injineerinka korontada ka shaqaysa, markaa waxaan rabay inaan mihnaddan ka sii wato waddankayga cusub sidoo kale. Hadda waxaan ka qalinjabiyey dugsi xirfadda lagu barto waxaanan helay shaqo mihnaddayda la xiriirta. Isdhexgalkaygu wuxuu ahaa hannaan dheer oo dhib iyo dheefba leh. Inaan awood u yeesho inaan kala hadlo dadka muhiimka ii ah waxyaalaha maskaxdayda ku jira ayaa muhiim ahaa.

Toivola-Luotolan Setlementti

ROHKEASTI IHMISEN PUOLELLA

**Buuggan hagaha ah waxa loo soosaaray inuu yahay waxsoosaarka ugu dambeeya ee mashruuca Aito (2021-2023).**

Isagoo elektaroonik ah buugga hagaha ee "Integration as a Family" ayaad ka heli kartaa www.toivola-luotola.fi
(Finnish, Carabi, Ingiriisi, Ruush, Sawaaxili, Soomaali)

**Baahiyay:**
Toivola-Luotolan Setlementti ry.
Monikulttuurinen työ/Aito-hanke. Kemi.

**Maalgalinta:** Sanduuqa Bulshada ee Yurub (ESF), Xarunta Waqooyiga Ost-robothnia ee Horumarinta Dhaqaalaha, Gaadiidka iyo Deegaanka, Xarunta Maalgalinta Daryeelka Bulshada iyo Ururada Caafimaadka (STEA)

**Qoraalka mashruuca:**
Elina Vettenranta, Piia Vottonen iyo Kirstia Majuri.

**Sawirka:**
Jan Åqvist, Nomon Oy

**Nashqadda iyo qaabka:**
Nomon Oy

TUETTU VEIKKAUKSEN TUOTOILLA

Euroopan unioni
Euroopan sosiaalirahasto

Vipuvoimaa EU:lta 2014–2020